KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad | Muqdisho, Tr. 1 Jennayo 1974 | L. 1

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ku tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 1 Tr. 13 Dishembre 1973 — *Guddiga Maamulka Wakaaladda Moska.* Bog 3

SHARCI L. 2 Tr. 20 Dishember 1973 — *Canshurta qiimaha Guryaha Daaraha ah.* » 4

SHARCI L. 3 Tr. 25 Dishember 1973 — *Toosin qodobka 220 aad ee Xeerka habka ciqaabta.* » 7

SHARCI L. 4 Tr. 27 Dishember 1973 — *Qalidda sabab-baarista dhimashada qaadidda iyo ka-faa'ideysiga xubnaha aadanaha.* » 7

SHARCI L. 5 Tr. 27 dishember 1973 — *Tijaabo cilmi ah oo lagu samayanyo dadka iyo xoolaha.* » 11

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, 17 Dishembre 1973, L. 1 — *Magacaawgii Wakiillada beesha-idaarada guddiga Kacaanka ee damgmada Gorawe.* » 13

XEER WASAARADDA CADDALADDA IYO DINTA, 27 Dishember 1973, L. 2 — *Magcaabid Garsoorayaasha Cusub.* Bog. 15

XEER WASAARADDA CADDALADDA IYO DINTA, 27 Dishember 1973, L. 3 — *Magcaabid Garsoorayaasha Cusub.* » 17

Madbacada Dawladda — Muqdisho

**SHARCIGA L. 3 Tr. 25 Dishembre 1973.**
**Toosin qodobka 220 aad ee Xeerka Habka Ciqaabta.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO AQOONSAN In ay tahay lagama maarmaan in la toosiyo qodobka 220aad ee Xeerka Habka Ciqaabta ayadoo la fiirinayo dhibaatada haysata dadka dacwadaha keensanayaa.

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA
Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

Waxaa la toosinayaa qodobka 220aad ee Xeerka Habka Ciqaabta, waxaana lagu kordhinayaa qayb 5aad oo ah sida hoos ku qoran:

« Hase yeeshee dacwadda madaniga ah oo la socota dacwadda ciqaabta oo dhacday, Maxkamadda ay markaa hortaalo ayaa halkaa ka wadi karta ee khasab kuma aha inay dib ugu celiso Maxkamadda hoose sida ay dhigayso qaybta 4aad ».

Qodobka 2aad

Sharcigan si deg deg ah buu u dhaqan geleyaa.
Muqdisho, 25 Dishmbre 1973.

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

**SHARCIGA L. 4 Tr. 27 Dishembre 1973.**

**Qalidda sabab-baarista dhimashada, qaadidda iyo ka-faa'ideysiga xubnaha aadanaha.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Waraaqda Koowaad iyo Waraaqda Labaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELINAYA go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

IYADO uu soo jeediyay Xoghayaha Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliint Sare iyadoo uu la qobo Xoghayaha Wasaaradda Caafimaadka;

WUXUU DEJINAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1

Waxaa halkan xeer laga dhikayaa qalliinka sabab-baarista dhimashada dadka ku dhinta isbitaallada, bukaan-eegtooyinka iyo meel kasta oooo Qaranku ugu tala galay daryeelidda caafimaadka si loo ogaado sababta dhimahada, cudurrada looga hor tago, nidaamka daryeelidda caafimaadka iyo baarista cilmiga ahna loogu hore mariyo.

Sidaasoo kale, waxaa iyana la mid ah qofkii u dhinta cudur uu la galay isbitaal ka dib markuu ka baxo isbitaalka ama meelaha aan kor ku soo xusnay.

Qodobka 2

Qalliinka sabab-baarista dhimashada laguma samayn karo qofkii caafimaadkiisa takhtarkii daryeeli jirey uu si cad uga soo qoro sababaha uu u dhintay, kuwaasoo la hubiyey inaan loo baahnayn in loo qalo cudurka dhimashada keenay dart.i

Diididdaas uu takhtarkaasi soo qorayna waa inay ka muuqataa oggolaanshaha iyo saxeexa Agaasimaha Isbitaalka ama qofka madaxa ka ah meelaha caafimaadka dadka lagu daryeelo.

Qodobka 3

Arrimihii kale ee leh xiise cilmi ku dhisan oo gaar ah, ama la yimaada waxyaalo dhif ah oon hore loo arag, waxaa qallinka sabab-baarista dhimashada amri kara Xoghayaha Wasaaradda Caafimaadka marka ay sidaas warsadaan takhaatiirtu, meel kasta dhimashadaasi ha ka dhacdee.

Qodobbada 1 iyo 2 markaas dhaqan geli mayaan.

Qodobka 4

Sharciyada ku saabsan qalidda sabab-baarista dhimashada loo samaynayo garsoorid awadeed, kana soo baxa madaxda sharciga, way daboolayaan sharcigaan.

Takhtarka daryeelidda caafimaadka qaabilsani haddii uu soo qorto waraaq uu sababo cilmi ku dhisan u doonayo inuu goob joogo baarista caynkaas ihi, garsooruhu wuu u oggolaan karaa, waxa se takhtarkaa mamruuc ka ah inuu siyaalo kale baarista u dhex galo, waana inuu fiiro gaar ah u yeeshaa waxyaalaha uu sharcigu farayo.

Waxaa sidaasoo kale iyana la mid ah ardayda takhtarnimada baranaysa oo diyaarinaya imtixaan hano-sharci, kolkii uu barahoodu warsado.

## Qodobka 5

Arrimaha lagu sheegay qodobbada 1, 2 iyo 3, ardayda laanta Takhtarnimada oo hore loogu oggolaaday markii barahooda laantu uu sidaas soo warsaday ayaa ka qayb geli karta qalidda sabab-baarista dhimashada.

## Qodobka 6

Iyadoo ay lama huraan tahay qalidda sabab-baarista dhimashadu, haddana meydka dhimashadiisu ay waafaksantahay siyaalaha logu sheegay Qodobkt 1aad, haddii uu soo warsado madaxa Kulliyadda Takhtarnimada ee Jaamacadda Ummadda, waxaa meelo gaar ah oo loogu tala galay loogaga faa'iideysan karaa waxbarashada hawlaha xubnaha aadanaha (Anatomia umana normale), qallinka xubnaha (Anatomia chirurgica) iyo dawada ku habsan oogada iyo xubnaha jirka dadka (Anatomia patologica e delle medicine legole).

Meydka waa in marka dambe hab qaabsan laysugu arruriyaa laysuguna celiyaa si sharf lehna loo xabaalaa.

Waxbaresho daraadeed, meydka waxaa laga reeban karaa qaybo oogadiisa ka mid ah oo lagu kaydiyo Kulliyedda Takhtarnimada ama isbitaallada.

## Qodobka 7

Waxaa la oggol yahay xubin1karidda in looga goosan karo xubnaha ama tifafka meydka ugu yaraan lixdan daqiiqo ka dib markii ay joogsato shaqada xoogga maskaxda xataa hoddii muddadaasi xubnaha dhiig-wareejiska si aan iskooda ahayn loogoge shaqaysiinayo (le funzioni cardio-circolatorie mantenute artificialmente attive).

Dhimashada sugan waxaa la ogaan karaa marka ay xarrijimaha masawirka maskaxda shaqadeedu hore ka muujiyaan dhadhaqaaq toosan

Qodobka 8

Qof nool waxaa xubno iyo tifaf laga qaadan karaa:

1. marka xubin-kariddus suura gal tahay iyadoo laga eegayo dhinaca dhugbaxa;
2. marka aanay xubin ama tif saariddodu dhaawac ama waxyeello halis ah u gaysanayn nolosha qofka laga seerayo;
3. marka qofka wax ku deegtoomaya garashadiisu dhan tahay, orrinna uu goosan karo, uu keenana xaashi qoran uu ku caddeynayo nuu raalli ka yahay, okyahayna qalliinkaas lagu samaynayo ee oogadiisa wax laga goynayo;
4. markii guddi ka kooban hal garsoore iyo laba takhtar ay hubiyaan in qofka wax ku deegtoomaya maskaxdiisu fayewdahay, maankiisuna waxba u dhinnayn, ayna ka soo qaadaan xaashida caddaynta ee uu qoray iyagoo og inuu miyir qab ku qoray, kuna dhiibay.

Qofka deegtoomaya goor kasta, intaan qalliinka la gelin ka hor, wuu ka bixi karaa, waana la noqon karaa oggoolaanshadiisii hore.

Qodobka 9

Gadidda iyo iibsiga xubnaha iyo tifafka looga jeedo xubinkariddu waa lagu mudan karo ciqaab 3 ilaa 5 sannadood oo xarig ah.

Ururinta dhiigga oo qawaaniin gaar ah lihi kuma jirto arrintan.

Qodobka 10

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, iyadoo uu soo jeediyay Xoghayaha Wasaaradda Caafimaadka, ayaa xeerinaya nidaamka lagu hirgelinayo sharcigan.

Qodobka 11

Sharci ama xeer kasta oo aan la socon ama kaba soo horjeeda xeerkani waa mid dhaqan beelay.

Qodobka 12

Sharcigan wuxuu raacayaa ururinta sharciyada Jamhuuriyadda Dimoqraddiga Soomaaliya wuxuuna dhaqan gelayaa degdeg, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 27 Dishembre 1973.

*Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre*
MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA